



PATIENT  
EDUCATION

# Tilmaamaha Nadiifinta Caloosha

## Daraasadda Kaabsulaha Ee Bukaanka La Dhigo Isbitaalka Golytely

Waa muhim in aad raacdo dhamaan talooyinka halkan lagu soo xusay si aad ugu diyaar garoowdo daraasadda kaabsulaha. Waa in uu maran yahay mindhicirkaaga yar, si uu dhakhtarku u arki sawirada uu soo qaado inta ay socoto daraasadda kaabsulaha.

### Daraasadda Kaabsulaha Ee Bukaanka La Dhigo Isbitaalka

- Way adag tahay in la gaaro oo lagu eego kaameerada mindhicirka yar. Dhakhaatiirtu waxa ay isticmaalaan kaabsulo loogu talo galay in uu sawiro ka soo qaado mindhicirka yar oo ay adag tahay in la gaari karo.
- Waxa aad liqeysaa kaabsulaha taasoo fududeyneysa in muuqaal laga soo qaado mindhicirka yar.
- Kaabsulaha yar waxa uu sawir ka qaadaa marka uu dhex maro mindhicirka yar. Waxa ay sawirada u dirtaa qalab jirkaaga lagu xirayo mudada ay socodo sawir qaadista.
- Kaamarada le'eg kiniiniga ee aad liqday dib looma isticmaalayo waxayna raaceysaa saxarada. Lagaama doonayo in aad meel dhigto.

### Maalinta ka horeysa daraasadda kaabsulaha ee bukaanka la dhigo isbitaalka

- Jooji cabitaanka sigaarka 8da aroornimo. Waxaa laga yaabaa in aad joojiso cabitaanka sigaarka 24 saac ka inta aanay bilaabana daraasadda mindhicirka yar.
- Biloow cabitaanka biyo cad.
- Biyaha cad waxaa ka mid ah:
  - Biyo, qaxwe madoow ama shaah (aan cadeys laheyn), Gatorade, biyo ubriya iyo kuwo aan ubrin (Coke, Isabarayt), casiir aan miro laheyn (tufaax, cinab cad, ,kanabaari cad), Jell-O, ama jalaatada popsicles. Xusuusnoow **HA CABIN CABITAAN CASAAN AMA MIDABKA HURDIGA AH.**
- Ha cunin wax cunto ah oo adag.
- 9 aroornimo ku dar Golytely weelka oo dhan oo si wanaagsan u rux. Talaajadda geli Golytely.
- Haddii aad jeceshahay in aad ku cabto iyada oo aan la qaboojin, waxa aad talaajadda ka soo saari kartaa 2 duhurnimo.
- Waxa aad ku dari kartaa baakad Crystall Light ah galaas kasta si aad u wanaajiso dhadhanka waxyaabaha aad isku dartay. Haku darin baraf cabitaanka aad isku dartay ee aad diyaarsatay.
- 4ta galabnimo biloow cabitaanka Golytely ee aad isku dartay. Waxa aad cabi kartaa oo kaliya laba liitar ama nus liitar cabitaanka aad isku dartay ee diyaarinta caloosha.
- Isku day in aad ku cabto koob qaada sideed wiiqiyadood 15kii daqiiqaba ilaa aad ka dhameeyso labada liitar ama kala bar cabitaanka. Waxa ay kugu qaadaneynsaa laba ilaa sadex saacadood ilaa aad dhameeyso cabitaanka oo dhan.
- Waa in aad suuliga ka ag dhawaataa ka dib marka aad bilowdo cabitaanka aad isku dartay. Waxaa kugu dhacaya shuban waxaadna u baahaneysaa in aad si degdeg ah u gaarto suuliga.
- Dadka qaar baa dareema yalaalugo ama lalabo, dibiro, ama matag inta ay cabayaan biyaha caloosha lagu nadiifinayo. Haddii ay sidaas kugu dhacdo, u naso 15-30 daqiiqo, ka dibna isku day in aad cabitaanka sii wado.

- **10ka fiidnimo cabitaanka biyaha cad. Daawada waxa aad ku kaban kartaa biyo cad oo kaliya.**
- Daadi inta ka soo hartaa Golytelyka aad isku dartay..

### **Maalinta ka horeysa daraasadda kaabsulaha ee bukaanka la dhigo isbitaalka**

- Daawada muhiimka ah in aad qaadata waxa aad ku kaban kartaa biyo cad oo kaliya 6da aronimo.
- Ha qaadan wax daawo ah wixii ka dambeeya 6da aronimo maalinta daraasadda kaabsulaha.
- Ha cunin oo ha cabin wax daawo ah wixii ka dambeeya 6da aronimo maalinta daraasadda lagu sameynayo mindhcirka yar.

### **Marka aad liqdo kaabsulaha ka dib oo lagu dhigay isbitaalka**

- Laba saac ka dib ayaa kaabsulahu bilaabaya hawshiisa.
  - Waxa aad cani kartaa biyo cad. Ha cunin wax cunto ah.
  - Ka fogoow dhamaan cabitaanka casaanka ama huriga ah.
- Afar saac ka dib marka aad liqday kaabsulahu daraasadda ayaa bilaabatay.
  - Waad qaadan kartaa daawadaada iyo cunto fudud.
  - Ha cunin hilibka cas.

---

Fariin/Tilmaamo gaar ah: \_\_\_\_\_

---